


MABAADI' DA XARUNTA

XARUNTU WAXAY KA DUULAYSAA MABAA-DI'DAAN:

- ◆ HUBINTA RUNTA IYO SAXSANAANTA
- ◆ DHEXDHEXAADNIMO
- ◆ XOOJINTA CADDAYMAHA
- ◆ MADAX BANAANI
- ◆ ILAALINTA AMAANADA
- ◆ XOOJINTA QIYAMKA



WIXII FAAHFAAIN AH KALA XIRIIR:

TEL: +252907633775
EMAIL: INFO@ALKITABCENTER.SO
WWW.ALKITABCENTER.SO

XARUNTA CILMI BAARISTA AL-KITAAB

مركز الكتاب للبحوث والدراسات



BARNAAMIJKA XARUNTA

WWW.ALKITABCENTER.SO



ARAGTIDA, FARRIINTA & YOOLASHA

- CILMI BAARIS
- KULAN CILMIYEED
- DOOD CILMIYEED
- TABABARO
- TALO BIXIN
- MAKTABAD

ARAGTIDA:

Xaruntu waxay doonaysaa inay noqoto xarun laga tusaale qaato heer degaan iyo heer gobol ba, oo ay noqoto hormuudka cilmi baarista ee Bariga Afrika.

FARRIINTA:

In la hormariyo nidaamka cilmi baarista, si loo gaaro horumarinta aqoonta bulshada, iyo in la helo jawi cilmiyeed dhiirigaliya dadaallada cilmi baarista ee gobolka.

YOOLASHA:

Xaruntu waxay leedahay himilooyin istaraatiijiyadeed oo u astaysan, waana sidaan:

- Dhiirrigelinta shaqada cilmi baarista iyo kobcinta heerkeeda.
- Horumarinta xirfadaha cilmi baarista ee maamulka iyo xubnaha xarunta.
- Hagidda cilmi baarista iyo daraasaadka si ay u gaaraan xalka dhibaatooyinka bulshada, si waafaqsan mabaadii'da cilmiga ah, una adeegaya dhismaha aqoonta.
- Abuurista jawi ku dhiirgalinaya cilmibaarayaasha iyo qoraayaasha wax soo saarka iyo cilmi baarista.
- Xoojinta iskaashiga lala yeesho xarumaha cilmi baarista degaanka, gobolka iyo caalamka.
- Adkeynta xiriirka xarunta iyo bulshada, iyada oo xaruntu xoogga saarayso daraasaadka arrimaha bulshada.
- Matalaadda dalka iyo bulshada ee kulammada aqooneed iyo shirarka caalamiga ah ee cilmi-baarista.
- La talinta ardayda jaamacaddaha si kor loogu qaado tayada cilmi baarista takhasuska ah.

QORAALLADA CILMI BAARISTA IYO DARAASAADKA

Qoraallada cilmi baaristu waa mudnaanta koo-waad ee Xarunta, iyadoo laga duulayo muhiimada ay u leedahay bulshada, sidaas darteed xaruntu waxay ku dadaalaysaa hagaajinta qoraaladda luqad ahaan iyo nidaam ahaanba, waxayna tixgelinaysaa runta, xaqiiqada, iyo ka fogaanshaha mawduucyada khilaafku ka jiro.

JOORNAALLADA CILMIGA AH

Joornaallada ayaa ah mid ka mid ah hababka loo daabacayo qoraallada cilmi baarista, ee ay an-xixiyeen khabiirto iyo khubaro takhasus u leh.

KULAMMADA CILMIGA AH

Xaruntu waxay qabanaysaa shirar iyo seminaaro cilmiyeed, sidoo kale muxaadarooyin aqooneed loo qabanayo bulshada, oo ay ka qaybgalayaan khubaro iyo aqoonyahan ku takhasusay dhinacyo kala duwan.

BANDHIGGA BUUGAAGTA

Xaruntu waxay boggeeda rasmiga ah, kusoo bandhigaysaa buugaag ku saabsan Soomaaliya iyo Geeska Afrika si ay u siiyaan fursado cid walba oo u baahan dukumintiyada muhiimka ah, gaar ahaan bahda aqoonta.

HAWLO KALE

Marka laga soo tago hawlahaas asaasiga ah, Xaruntu waxay bixinaysaa adeegyo kale, sida koorsooyinka tababarka, sawirada infographic ah iyo muuqaallada video-ga ah ee sharaxaya qoraal-lada kala duwan ee Xarunta.



HAWLAHA XARUNTA:

- ◆ ABUURIDDA CILMI BAARIS IYO DARAASADO LA XIRIIRA BULSHADA SOOMAALIYEED IYO BULSHADA BARIGA AFRIKA, SI LOO HUBIYO LOONA FALANQEEYO ARRIMAHA BULSHADA, DHAQAALAH IYO GOOBAHA KALE EE MUHIIMKA AH, SI LOOLA TACAALO LOONA XALIYO.
- ◆ XOOJINTA CILMI-BAARISTA IYO DARAASAADKA AKADEEMIGA AH SI LOO TAYEEYO TAKHASUSKA.
- ◆ IS KAASHI LALA SAMEEYO HAY'ADAHA CILMI BAARISTA EE DALKA IYO KUWA CAALAMIGA AH SI DALKA LOOGU HORSEEDO CILMI IYO AQOON TAYO LEH.
- ◆ ABAABULIDDA AQOON-IS-WEYDAARSI LOOGU TALAGALAY AQOONAHANKA IYO ARDAYDA, SI KOR LOOGU QAADO WAX-KU-POOLKA CILMIGA, FARSAMADA IYO XIRFADAH IYO AQOONAHANKA BULSHADA.
- ◆ QABASHADA KULAMO, DOODO CILMIYEED, IYO KOORSOYIN TABABAR AH SI LOO ADKEEYO XIRIIRKA CILMI-BAARISTA EE U DHEXEEDA CILMI-BAARAYAASHA IYO TAKHASUSAYAASHA DHINACYADA KALA DUWAN EE AQOONTA IYO BULSHADA.
- ◆ SOO SAARIDDA JOORNAALO CILMI AH SI LOO DAABACO DARAASADO CILMIYEED OO DHINACYO KALA DUWAN AH.